Xafiiska Siyaasadda &
Xiriirka Wilaayaadka

مكتب السياسة
والـــولايـــات

بسم الله الرحمن الرحيم

10صفر 1433

# ***Jawaab ku aadan bayaankii kasoo baxay***
# **Odayaasha Beesha Leelkase.**

الحمد لله رب العالمين ، والصلاة والسلام على نبينا محمد وآله وصحبه .

**قال الله تعالى:** **يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِن جَاءكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَأٍ فَتَبَيَّنُوا أَن تُصِيبُوا قَوْماً بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَى مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ**

Ugu horreyn waxaan tacsi u diraynaa eheladii iyo dhammaan qaraabadii uu ka geeriyooday Dr. Sheekh Axmed Cabdiraxmaan (Allaaha u naxariisto), Tacsidaa kadib; waxaan cadaynaynaa in dilka Sheekha aan u maqalnay sida dadka caadiga ah u maqleen wax lug ahna aysan Xarakda Mujaaahidiinta Al-Shabaab ku lahayn, wax lala yaabana ma aysan ahay in dilkii Sheekha kadib ay Maamulka Ashahaado la dirirka ah ee Faroole iyo qaar culumo sheegtay balse isaga kahoos shaqeeya ay durbadiiba eedda dusha Mujaahidiinta uga tuuraan iyadoo uu weli dhiigii sheekha qoyanyahay.

Ka hor bayaanka ay Beeshu soo saartay qorshaheenu ma aheyn in aan ka jawaabno eedeymaha ay jeediyeen dadkaas aan soo sheegnay ee caadaystay inay wixii xunba Mujaahidiinta ku eedeeyaan, kuwaas hadalkoodu wax wal-wal ah naguma haynin

Hadaba Xafiiska Siyaasada iyo Xiriirka Wilaayaat-ka ee Xarakada Al-Shabaab Almujaahidiin wuxuu ka jawaabayaa bayaankii ka soo baxay walaalaheena Odayaasha beesha Leelkase, maadaama iyagu ay yihiin dadka iska leh dhiigga Sheekha, waxaanan leenahay anagoo Allaah Kaashaneyna:-

- In Xarakada Al-Shabaab Almujaahidiin aysan wax xiriir ah lalahayn falkii lagu dilay Dr. Sheekh Axmed Cabdiraxmaan (Allaha u naxariisto) eedeymaha loosoo jeediyay ee ah inay Mujaahidiintu ka dambeeyeena ay yihiin eedeymo baadil ah oo aan haba yaraatee wax cadaymo ah loo haynin.

- Diinteena Islaamku waxey xarrimeysaa in xaq darro lagu daadiyo dhiigga qof Muslim ah, qof kasta oo naga mid ahna sidaas ayuu aaminsanyahay, Manhajkeenuna wuxuu ku dhisanyahay dhowrista Maqaasida Shareecada ee ay ugu horeyso Diinta kadibna nafta qofka Muslimka ah.

- Bayaanka Beesha Leelkase ay soo saareen waxaa ku xusan in beeshu ay guddi u saartay baaritaanka cidii ka dambaysay Dilka Sheekha, gudigaas ma jirin wax xiriir ah oo uu lasoo sameeyay Mujaahidiinta si uu uga xaqiijisto una ogaado mowqifkooda ku aadan dhacdada, arinkaas oo u muuqda in guddigu si ula kac ah ay u marin habaabiyeen amaanadii ay beeshu u xilsaaratay.

- Beesha Leelkase waxay ogtahay in dhowr jeer oo hore la isku dayay in la marin habaabiyo beesha, waxaanna ka xusi karnaa dhacdadii dagaalkii Gaalkacayo ee xaafadda Garsoor in maamulka Ashahaado-la-dirirka Puntland markhaati u keensadeen muuqaal been abuur ah oo qof ay si qasab aah uga soo qaadeen, taasoo indhihiinana aad ku aragteen in muuqaalkaasi been abuur ay iyagu sameeyeen noqday. Sidoo kale waxaan xusi karnaa dhacdadii lagu diley Nabaddoon Xasan Walloore, kuna caddaatay markii dambe Maamulka Ashaahada-la-dirirka Puntland.

- Ibraahim Xirsi oo ku hadlayay afhayeenka ugaaska beesha Leelkase oo shirkaasi ka qayb galay ayaa waraysigii uu siiyay BBC-da subaxnimadii Sabtida oo ku aadanayd 31/12/2011 ku sheegay in baarintaanka ay wax ku saleeyeen uu yahay baaritaan ay Puntland u keentay beesha, isla markaana ay ku qanceen oo sidaas ula ekaatay iyaga. Isagoo afkiisa ku caddeeyay mar la waydiiyay baaritaankooda iyo midka Puntland wuxuu sheegay in ay hal baaritaan isku yihiin, arinkaas oo meesha ka saaraya in baaritaanku yahay mid madax banana isla markaana xaqiijinayana in uu yahay baaritaan ay Ashahaada-la-dirirku soo diyaariyeen.

- Hadaba baaritaankaa ay sheegtay beeshu in ay Puntland samaysay beeshuna ku qanacday waa mid aan caddaalad ahayn, waayo waxaad ogtihiin in Maamulka Ashahaado-la-dirirka Puntland ku caanbaxay been abuurka iyo ka been abuurashada dadka Muslimiinta ah.

- Waxa kale oo aan caddaynaynaa in aysan jirin dad ama xubno ka tirsan Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab oo Maamulka Ashahaado-la-dirirka Puntland u qabteen falkii lagu dilay Sheekha, hadii ay jiraan dad ay ku sheegeen inay arintaas usoo qabteena waa been abuuradii ay ku caanbexeen mid la mid ah.

Ugu dambayntii waxaan ugu baaqaynaa walaalaheena beesha Leelkase inaysan u nuglaanin dhagarta uu cadawgu u maleegaayo ummadeena Muslimka ah ee Soomaaliyeed kuwaas oo ujeedooyinka ugu waaweyn ee laga leeyahay ay tahay in la iska horkeeno Mujaahidiinta cadawga la dagaalamaysa iyo qabaa'ilka Muslimiinta ah ee garab taagan.

Wabillaahi Towfiiq.